

# Adeegyada Daryeelka Ilmuhu waa xarumaha dadweynaha

Marku ilmahaagu tago xarunta daryeelka ilmaha waxaa lagu siiyaa fursad gaar ah si loo caawimo doorkaaga waalidnimo isla markaana ilmahaaga daryeelka loogu hayo. Kaalmadaasi waxay timaadaa:

- marka daryeellayaasha adeega joogaa og yihiin muhiimada sanadaha ee koriinka hore oo ilmaha, caafimaadka iyo samaqabka,
- marka uu jiro xiriir ka dhexeeya adeega daryeelka ilmaha iyo hay'adaha kale iyo mihnadlayaasha ka tirsan bulshada kuwaas oo kaalmeeya qoysaska iyo carruurta, iyo
- marka daryeellayaashu si dhab ah u qaataan doorka ay ka cayaari karaan caawinta qoyska si ay u hellaan adeegyada kale oo ay u baahan yihiin inay caawimaan carruurtooda la hayo.

## Muhiimada ilmaha koritaankiisa ee sanadaha hore

Daryeellayaasha adeegyada daryeelka ilmaha waa og yihiin muhiimada kriinka sanadaha hore ee ilmaha, caafimaadkiisa iyo samaqabka waxaana ka go'aan inay siiyaan ilmahaaga daryeelka ugu fiican si ay ugu suurtageliyaan in ilmuhu yeesho awooda ugu saraysa. Yeelashada fahmid fiican oo koritaanka ilmanimada hore iyo aqoonsiga muhiimada heerkaan ee nolosha shakhsiyeed aad ayeey muhiim ugu tahay in barnaamijya taya fiican leh laga bixiyo adeega dhexdiisa. Daryeellayaashu waxay isu geeyaan fahmidooda waxa carruurta u baahan yihiin iyo ka dib markay adiga kaala hadlaan waxaad rajaynayso, waxaad welwel ka qabto iyo waxa muhiimka u ah ilmahaaga iyo isku deyida siinta khibrada kaalmaysa koritaankiisa horumar iyo barasho.

Waalid ahaan waa inaad ku qanacsanaataa inaad weydiiso su'aallo kalana hadashaa arrimaha ku saabsan sida lagu bixinayo barnaamijyada loogu talagalay kaalmaynta ilmahaaga caafimaadkiisa iyo koriinkiisa. Markay kula qaybsadaan daryeellayaashu macluumaadka guud oo ku saabsan ilmaha koriinkiisa iyo arrimaha kale, iyo marka adiga iyo daryeellayaashu aad wadaagaysaan macluumaadka ilmahaaga, waxaa lagu caawimayaa doorka waalid ahaan. Daryeellayaashu waxay kaloo ka faaiidaystaan sidaad wax u aragto ama u ogtahay.

## Xiriirka u dhexeeya adeegyada daryeellida ilmaha iyo hay'adaha kaleeto iyo mihnadlayaasha kaalmeeya qoysaska iyo carruurta

Adeegyada daryeelka si gaara uma shaqayn karaan haddii la rabo in laga mira dhaliyo. Waxay u baahan yihiin inay xiriir la yeeshaan waalidiinta iyo adeegyada iyo hay'adaha carruurta qaabilsan. Xiriirkaasi wuxuu caawimaa daryeellayaashu inay shaqo fiican ku qabtaan adeegyadooda, iyo wliba in la suurtageliyo in lagugu xiro mihnadlayaasha ku haboon oo ku caawimi kara. Markaad dareento in waalid ahaan lagu caawimo waxaad dareemaysa in lagu awoodgeliyey waxaadna u fulinaysaa doorkaaga si fiican. Daryeellayaashu waxay ku siin karaan talo wixii ku saabsan sida lagu helli karo adeegyada, hay'adaha iyo mihnadlayaasha, sidaas darteed weydii.

Kala hadal adeega daryeelka ilmaha wixii ku saabsan waxaad u baahan tahay waalid ahaan marka lagu daro daryeel ilmood oo taya fiican leh. Macluumaadkaani wuxuu siin doonaa adeega daryeelka ilmahaaga asaaska samaynta xiriir siyaada ah si wax loogu qabto qoysas badan oo kala duwan iyo baahida ilmaha aad adiga iyo waalidka kale carab-baabteen. Dhis hawl la qaybsiga adeegyada kale. Adeega daryeel ilmoodka wuxuu noqday qayb la aaminay oo ka mid ah nolosha qoyska muhiim ayuuna u yahay xarumaha bulshada.



Dadaalka

Waxaa taageeray



CENTER FOR  
Community  
Child Health



Royal Children's  
Hospital



Johnson & Johnson  
PROFESSIONAL & EDUCATIONAL SERVICES  
Health Care for Life



National Childcare Accreditation Council



Australian Government  
Department of Family and  
Community Services